NorLevo®
levonorgestrel 1,5 milligraam

Somaliska
2006.02

NorLevo® – daa dawo ama kiniin wax ku ool ah oo si deg deg ah loogu qaato ka hortagga uuraysiga

Waa maxay NorLevo®?

NorLevo® waa kiniinka degdegga ah ee ka hortagga uureysiga oo la qaato, ka dib marka uu dhaco falka galmada aan lagu talogalin ama lagu guuleysan waayo hab kale oo looga tabaabusheysto uur-qaadka. Isticmaalka NorLevo® waxaa loogu talogalay in looga hor tago uureysiga. NorLevo® waxaa ku jira hormoonka jinsiga ee levonorgestrel, oo ah walax iyadana ku jirta kiniiniyada ka hortagga uureysiga iyo kiniini-yaroyaasha qaarkood. Waxtarka kiniinkan wuxuu wanaagsan yahay wakhtiba wakhtiga uu ka horeeyo falka galmada ka dib. Qatarta uureysiga waa 0,4%, haddii NorLevo® isticmaalkiisa la billaabo isla maalinkii falgalmeedka aan laga tabaabusheysan uu dhacay, maalinka xigana haddii la billaabo qatartu waa 1,2%, maalinka saddexaadna waa 2,7%.

Sidee loo qaataa NorLevo®?

Daawadu waa 1 kiniini oo ka kooban 1,5 milligraam oo levonorgestrel ah. Kiniiniga waxa la qaataa muddo aan ka danbeyn 72 saacadood (3 cisho) galmada aan aan lagu talogalin ka dib NorLevo® waxaa la isticmaali karaa markii la doono ee muddada wareegga caadada. Isticmaalka NorLevo® ka dib waxaa wanaagsan in loo beddesho hab kale oo uureysiga la isaga ilaaliyo, sida bacda ay raggu ama haweenku isticmaalaan amaba daawada disha unugyada xawada, ilaa iyo caadadu timaaddo. Qaadashada NorLevo® ma hor istaagayo isticmaalka kiniinka ka hortagga uureysiga.

Sidee buu NorLevo® kaaga difaacayaa uureysi aadan dooneyn?

Sida uu NorLevo® kaaga difaacayo uureysiga si buuxda uma cadda. Habka ugu muhiimsan waxaa loo maleynayaa inuu yahay in NorLevo® uu hakiyo ama daahiyo ugax-tuuranka.

Goormaa la baaraa jiritaanka uurka?

Dhiig u eg kan caadada wuxuu imaan karaa haddii xitaa uu uur jiro. Si loo hubsado inuu NorLevo® wax tar yeeshay iyo in kale waa in la maraa baaritaan uur 3-4 toddobaad ka dib. Waa shardi in la sameeyo baaritaan uur haddii caadadu ay wakhtigeeda ku timaaddo balse aysan caadi aheyn, ama ay soo daahdo wax ka badan 5 cisho. Isticmaalaha kiniiniga ka hortagga uureysiga waa inay uur iska baartaa haddii ay caadadu ku imaan weydo muddada loogu talogalay ka nasadka kiniinigaas ee ku xigay isticmaalka NorLevo®.

Goorma ayaa la isticmaali karaa NorLevo®?

- Haddii bacda raggu ay u shaqeyn weyday sidii loogu talogalay (siibatay ama dilaacday)
- Haddii qaadashada kiniinka ka hortagga uureysiga la illoobay ama la dhaafiyey wakhtigeeda (eeg warqadda isticmaalka kiniinka)
- Haddii bacda haweenka ay ka baxday halkeedii ama laga saaray wakhti hore
- Haddii qalabka lagu xiro minka uu ka baxay halkiisii ama uu soo dhacay
- Hadii isticmaalka hababka "bannaan ku daadinta" ama "waayaha la hubo" lagu guuldarreystay
- Marka sabab uun loo galay falgalmo aan laga tabaabusheysan
- Haddii lagu kufsaday.

NorLevo® saameyn xun ma leedahay?

Sida daawo kasta bay NorLevo® saameyn xun u yeelan kartaa. Astaamaha xun ee caadiga ah waxaa ka mid ah: lallabo, ubuc-xanuun, tabardarro, madax-xanuun, madax-wareer, bog-maroojis, mantag iyo shuban.

Imisa goor baan NorLevo® qaadan karaa?

NorLevo® waxaa la isticmaalaa marka ay lama-huraanka tahay oo xal kale la waayo, loogumana talogelin inay baddesho hababka kale ee ka hortagga uureysiga. Ma habboona in la isticmaalo marar badan hal wareeg-caado gudihiis waayo waxay taasi xoojineysaa qatarta caado-wareerka. Haddii ay noqoto isticmaal joogto ah waxaa jira habab kale oo ka wanaagsan oo looga tabaabusheysto uureysiga. La tasho takhtar ama umuliso.

Maxaa dhacaya haddaan durbaba xaamilo ahay markaan NorLevo® qaadanayo?

NorLevo® waa kiniin degdeg loo qaato oo horistaaga uureysiga. NorLevo® sooma ridi karo uurjiifka. Haddii aad durbaba xaamilo tahay markaad qaadaneyso NorLevo® wax saameyn ah oo qatar geliya uurjiifka ma yeelaneyso daawadan.

NorLevo® ma soo ridaa uurjiifka?

Maya. NorLevo® waxba kama tari karo uur sameysmay oo sooma rido uurjiifka. Baaritaano cilmiyeed la sameeyeyna laguma arkin in uurjiifka uu halis u yahay wax dhaawac ah isticmaalka 1,5 mg levonorgestrel ka dib.

Bacda ragga – waa difaaca ugu fiican ee looga hortago cudurada lagu kala qaado galmada!

NorLevo®, wuxuu bacda ragga kaga geddisan yahay, kaama difaacayo cudurada lagu kala qaado galmada. Bacdu waxay kaa difaaceysaa cudurdaas iyo uureysiba. Xusuusnow inaad isticmaasho bacda markaad jaalkaa galmada baddeleysid.

Mararka qaarkood waa in qofku ka fakaraa ...

12 Su'aalo iyo jawaabo

1. Ma lala qaadan karaa NorLevo® daawooyin kale?

Waxtarka NorLevo® sidii loogu talogalay ma noqdo hadii lala isticmaalo daawooyinka soo socda midkood: qaar ka mid ah daawooyinka qaaxada (rifabutin iyo rifampicin), qaar ka mid ah daawooyinka hurgunka – HIV (ritonavir), antibiotikada qaarkeed (griseofulvin), qaar ka mid ah daawooyinka qallalka (fenobarbital, fenytoin, primidon iyo karbamazepin) iyo daawada dabiiciga ah ee Hypercium perforatum (loona yaqaan cawska wadaad John).

2. Ma la iibsan karaa NorLevo® qoraalka daawada la'aantiis?

Haa, NorLevo® waa laga iibsan karaa farmashiyaha oo uma baahnid inuu takhtar kuu soo qoro (rejeeto la'aan).

3. Goorma ayaa laga digtoonaadaa NorLevo®?

NorLevo® uma fiicna haweenka beerkooda shaqadiisa aysan wanaagsaneyn ama kuwa cudur ka qaba xiidmaha ee yareeya milanka ay daawada jirka ku milanto (sida cudurka Kroon – Crohns disease)

4. Maxaa laga yeelaa NorLevo® marka ilmo la nuujinayo?

La tasho adeegayaasha farmashiyahaaga ama su'aal umulisadaada / takhtarkaaga.

5. Maxaa la sameeyaa haddii la hunqaaco qaadashada NorLevo® ka dib?

Haddii aad ku hunqaacdo 3 saacadood gudahood waxaa wanaagsan inaad isla markiiba liqdid 1 kiniini oo hor leh si aad uga gungaarto. Taasoo micnaheeda uu yahay in loo baahan yahay inaad baakad hor leh soo iibsatid si aad daaweynta u dhameystirtid.

6. NorLevo® qaadashadiisa ma keenaa dhiigbax dheeraad ah?

Badanaa dhiigbax dheeraad ah ma dhaco, balse waa suurogal. Dumarka qaarkood waxay caadada helaan malin ka hor ama ka dib wakhtiga ay filayeen. Haddii NorLevo® la isticmaalo dhowr jeer hal wareeg-caado gudihii halista caado-wareerka waxay noqotaa mid weyn.

7. Sideen u qaataa kiniinkeygii dawada NorLevo® ka dib?

Haddii habka aad uga tabaabusheysan jirtay uureysiga uu ahaa isticmaalka kiniinka ka hortagga uureysiga, waa inaad qaadashadiisa sida caadiga ah u wadataa. Waxaan kugula talineynaa inaad habka qaadashada kiniinka ku buuxisid isticmaalka bacda wiigga xiga. Haweenka isticmaala kiniinka loo yaqaan kiniini-yare waxaa marar badan ku dhacda diigbax aan joogto ahayn. Haddii aad isticmaashid kiniini-yaraha waa inaad muddo ku xigta 3-4 toddobaad qaadashada NorLevo® ka dib sameysaa baaritaan, si aad u hubsatid inaadan uur lahayn.

8. Sidee lagu ogaadaa inuu NorLevo® maxsuul yeeshay?

Si aad u hubiso inaadan uuraysan waa inaad samaysaa baaritaan uur 3-4 toddobaad ka dib. Waa lagamamaarmaan inaad sameysaa baaritaan uur haddii ay caadadu wakhtigeedii ku timid balse ayan caadi ahayn ama ay soo daahdo muddo ka badan 5 beri.

9. Xaggee wakhti booqasho-tixraac ah laga qabsadaa si loo helo talojeedin ku saabsan ka hortagga uureysiga?

Iswidhan: La xariir umulisada joogta goobta qaabilaadda dhalinyarada ama rugta daryeelka hooyooyinka ama xarunta umulisada ee xaafadda aad deggan tahay. Taleefanlambarka waxaad ka heleysaa buugga taleefannada Bogaggiisa Casuurka ah.

Danmaark: Haddii aad su'aalo ka qabto ka hortagga uureysiga, habka wadanoolaanshaha iyo falka-galmada waxaad la xiriiri kartaa rugta caafimaadka xaafaddaada ama soo waci kartaa lambarada soo socda midkood:

- Farmashiyaha
- Ururka Talobixinta Caafimaadka Bulshadeed ee Galmada & Ka hor tagga Uureysiga, Tlf: 331 39 113, http://www.sexogsamfund.dk
- Leynka dhalinyaroda ee arimaha galmada, Tlf: 702 02 266, www.sexlinjen.dk
- www.netdoktor.dk

Noorway: Haddii aad su'aalo ka qabto ka hortagga uureysiga, habka wadanoolaanshaha iyo falka-galmada waxaad la xiriiri kartaa rugta caafimaadka xaafaddaada ama soo waci kartaa lambarada soo socda midkood:

- Taleefanka SUSS (Xarunta Dhalinyarada, Wadanoolaanshaha iyo Arimaha Galmada), 800 33 866
- Taleefanka caafimaadka galmada, 810 02 244
- Xarunta warbixinta caafimaadka galmada, 23 22 80 60

10. Muddo intee la eg galmada ka dib baan qaadashada kiniiniyada NorLevo® la sugi karaa?

NorLevo® waxaa la qaataa sida ugu dhaqsada badan ee la awoodo, inta u dhexeysa 12 saacadood illaa ugu badnaanna muddo 72 saacadood (3 cisho) gudahooda galmada ka dib.

11. Ma jirtaa warbixin loogu talogalay isticmaalaha NorLevo® ee ku qoran luuqado dhaafsiisan tan Iswiidhishka?

Warbixinta loogu talogalay isticmaalaha NorLevo® waxay ku qoran tahay 11 luuqadood sida: Ingriisiga, Jarmalka, Fransiiska, Finishka, Isbaanishka, Turkiga, Beershiga, Carabiga, Boosniga/Kruayshiga/Seerbiga, Sooraaniga (Kurdiga) iyo Soomaaliga. Warbixinta isticmaalaha waxa laga soo qaadan karaa farmashiyaha ama goobta qaabilaadda dhalinyarada. Waxaa kale oo warbixinta ku qoran luuqadda la doonayo laga heli karaa www.norlevo.nu

12. Adeegayaasha farmashiyaha sirta ma ceshaan?

Haa, adeegayaasha farmashiyaha mar waliba waa ku shardi inaysan warka loo sheegay cid kale kala hadlin.
Si feejigan u dhuux warbixinta daawada la socota.
NorLevo® waa summad ganacsi u diiwangashan Nycomed.

Nycomed AB
Box 27264, 102 53 Stockholm, Sverige.
Tel. (+46) 8 731 28 00
www.nycomed.se

Nycomed Pharma AS
P.O. Box 205, 1372 Asker, Norge.
Tel. (+47) 66 76 30 30
www.nycomed.no

Nycomed Danmark A/S
P.O. Box 88, 4000 Roskilde, Danmark.
Tel. (+45) 46 77 11 11
www.nycomed.dk

Mararka qaarkood waa in qofku ka fakaraa ...